

Waayo-aragnimada dib-u-dejinta

Mohammed:

Maxamed waa 25 jir ka yimid magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya. Wuxuu ka tagay Suuriya isaga oo dhalinyaro ah, bilowgii colaadda, waxa uu u dhoofay Masar isaga iyo qoyskiisa oo ay ku noolaayeen muddo toddoba sano ah.

Ka hor inta aannu Mohammed ogaanin isaga iyo qoyskiisa in dib loo dajin doono UK sanadka 2019, waxa uu ogaa saddex arrimood oo muhiim ah oo ku saabsan dalka: kubbadda cagta, Big Ben iyo in baabuurta lagu wado waddada dhinaca bidix. Waxa uu taageeraa kooxaha kubbadda cagta Liverpool iyo Manchester City, markaa wuu ogaa in kuwani ay ku yaalaan UK, waxa kale uu maqlil jiray London, si kastaba ha ahaatee, waligiis ma uu maqlin Canterbury, oo noqon doontaa hoyga isaga iyo qoyskiisaba .

Habka dib-u-dejinta

Nolosha Masar way ku adkeyd qoyska Mohammed, waxay la halgamayeen sidii ay sharci uga heli lahaayeen dalka oo ay dhaqaale ugu heli lahaayeen, Sidaas awgeed, Maxamed waxa uu sannadihii dhawr iyo tobanka sanno ku qaataay Masar isaga oo ka shaqaynayey sidii uu qoyskiisa u taageeri lahaa halkii uu wax ka baran lahaa. Waxa ay rajaynayeen in ay u dhoofaan dalka Jarmalka oo qaar badan oo ka mid ah qoyskooda ay degeen, balse markii ay maqleen in loo tixgalinayo in dib-u-dajin loo sameeyo UK, aad ayay u farxeen oo waxa ay rajaynayeen in ay nolol cusub bilaabaan.

Mohammed iyo qoyskiisa ayaa UNHCR ay ka wareysatay dib-u-dajinta UK 2018, balse ma aysan dhoofin ilaa ku dhawaad labo sano kadib*. Waxa ay bilaabeen in ay ku fikiraan in aanay waligood soo gaadhi doonin dalkan UK markii ay maqleen qoysas kale oo la waraystay iyaga ka dib in ay u dhoofeen UK horantood.

Wacyi-gelinta dhaqanka

Qiyaastii saddex bilood ka hor inta aan loo dhoofin UK, Mohammed, waalidkiis iyo walaalkiis kayar waxay IOM kala qayb galay fasaladooda wacyigelinta dhaqanka. Fasaladoodu waxay socdeen saddex maalmo. Waxay barteen calamada kala duwan ee UK, xoriyadda, dimuqraadiyadda iyo waxbarasho. Wacyigelinta dhaqameed ee dhabta ah ee Mohammed, si kastaba ha ahaatee, waxay ku timid cilmi-baadhis badan u ku sameeyay nolosha UK marki u bilaabay urur Facebook iyo WhatsApp ah u addega Siiriysiinta hore UK ku noola.

Inkastoo uu qirayo in xanta lagu faafiyo bartaani, haddana wuu dareemay lahadalka kuwii hore loo dejiyay ayaa ah waxa si fiican u diyaariiyay nolosha gudaha UK. Markii uu maqlay in qoyskiisa la dejin doono Canterbury, wuu helay Suuriyiinta kale ee ku nool magaalada kuwaas oo u suurtagashay in ay ogaadaan halka ay reerkiisu ku noolan doonaan. Marka uu eegay Khariidadaha Google-ka, waxa uu bartay xaafaddiisa ka hor inta aanu iman.

Rajada iyo xaqiiqada

Markii uu la hadlayay Suuriyaanta kale ka hor imaatinkiisa, Maxamed wuu ogaaday in nolosha UK aan fududayn marka hore. Wuxuu isu dhiiri galiyay in uu si adag uga shaqeeyo barashada af Ingiriisiga. Wuxuu uusan waligiis saadaalin karin ayaa ah in cudurka faafa ee Coronavirus uu carqaladeyn doono noloshiisa afar bilood oo keliya ka dib markii uu yimid UK. Ma ahayn mid noqda "baradho sariir", Maxammed wuxuu go'aansaday in uu sii dhiirinaado oo uu sii wado horumarinta af Ingiriisigiisa inkastoo albaabadi loo laabay dalka oo dhan**.

La qabsiga noloshiisa cusub

Maxamed waxa uu had iyo jeer lahaa dareen adag oo masuuliyadeed oo ku aaddan daryeelka qoyskiisa - isagoo ku qasbana inuu shaqeeyo isaga oo da'da yar si uu u taageero. In kasta oo uu cudur faafay aad ayuu u isu dhiirigeliyay in uu sii wado hormarka iyo ku milanka bulshadiisa, si kastaba ha ahaatee waxaa jira waxyaabo badan oo uu ka tabayo noloshi Bariga Dhexe. Wuxuu u xiisay tolkiis iyo u dabaaldagaya ciidaha bulshadiisa balaadhan. Fasaxyada sida Ramadaanka, kuwaas oo Bariga Dhexe ah ahaa dabbaaldeg bil aha ah ee wax yar xataa dhowado taa England.

Waxa kale oo uu arkay qaar ka mid ah kala-duwashada dhaqameed ee muhiimka ah oo uu weli la qabsanayo ku dhawaad hal sano ka dib joogitaanka UK. Tusaale ahaan doorarka jinsiga ayaa halkan ku kala duwan: haweenka ka shaqeeyaan dibadda aad u badan, ragga iyo dumarka jirka ayay iska taabtaan xitaa dadweynaha hortooda. Sidoo kale waxaa ka qosliya dhaqanka Ingisiiska ee sticmaalka kalmada "raali ahow" iyo mahadsanid" sabab la'aan.

*Inkasta oo wakhtiga caadiga ah u dhaxeeya waraysiga UNHCR ilaa socdaalka uu yahay ilaa lix ilaa siddeed bilood, waxay qaadan kartaa waqtii dheer qoysaska qaar sababo kala duwan awgood. Waxaa dhici karta in qaxootiga aan waligood loo sheegin sababta dib u dhaca.

** Wareysigan waxaa si fool-ka-fool ah af Ingiriisi lala yeeshay Mohammed 10 bilood oo keliya ka dib markii uu yimid UK.